



Xaqiiqooyinka Degdega ah ee Ku saabsan Dib u cusboonaysiinta Medicaid kaaga, Child Health Plus, ama Caymiska Essential Plan Health

Adiga ama xubin kamid ah qoyskaaga hadda maka haysataa caymis caafimaad New York State Medicaid, Child Health Plus ama Barnaamijka Essential Plan?

Gobalka New York wuxuu mar dhaw bilaabi doonaa inuu eego shuruudaha u qalmiitanka si uu u hubiyo in dadka diiwaanka gashan ay wali u qalmaan barnaamijyadaan. Arrintaan waxay la micno tahay in lagaaga baahan karo inaad qaado tallaabo aad ku cusbooneysiineyso caymiskaaga caafimaadka ama caymiska xubnaha qoyskaaga. Tusaale ahaan, Haddii dakhligaaga uu wax wayn iska badalay marka la eego dakhliga aad heli jirtay kahor inta aanu bilaaban aafada COVID-19, waa macquul inaad u baahato inaad xogtaas u gudbiso NY State of Health si aad wali oga sii diiwaangashanaato caymiska caafimaadka.

Waxaan halkaan ku qoran qaar kamid ah waxyaabaha aad sameyn karto hadda si aad u diyaargarowdo:

1 Iska qor barnaamijka fariimaha digniinaha ah.

Isqor si aad u hesho fariimaha qoraalka ah SMS/MMS ee laga soo diro NY State of Health si aadan u seegin xog muhiim ah oo ku saabsan caymiska caafimaadka, oo ay kujiraan goorta ay tahay inaad cusbooneysiiso caymiskaaga. Si aad iska diiwaangeliso, **qoraal aad ku qortay START u dir 1-866-988-0327.**

2 Xaqiiji in ciwaankaagu saxan yahay.

Xaqiiji in NY State of Health ama xafiiska Medicaid ee deegaankaaga ay hayaan ciwaankaaga boostada ee hadda, taleefan lambarkaaga iyo ciwaanka iimaylka si ay kuula soo xariiraan marka ay rabaan inay kaala hadlaan caymiskaaga caafimaadka.

Haddii aad caymis ka hesho NY State of Health, waxaad:

- Wac 1-855-355-5777 (TTY: 1-800-662-1220)
- Ciwaankaaga ka gal bartaan [nystateofhealth.ny.gov](https://info.nystateofhealth.ny.gov)
- Qof ku caawiya ka heli kartaa <https://info.nystateofhealth.ny.gov/findassistor>

Haddii aad Medicaid **ka hesho xafiiska Medicaid ee degmadaada ama Maamulka Ilaha Dadwaynaha ee Magaalada New York City (New York City's Human Resources Administration, (HRA)**, la xariir xafiiska deegaankaaga adoo adeegsanaaya ciwaankaaga iyo meelaha lagaala soo xidhiidho.

3 Qaad Tallaabo.

Markay tahay wakhtiga dib loo cusboonaysiinayo caymiskaaga caafimaadka, waxaad heli doontaa warqad ka socota Gobolka NY ee Caafimaadka ama xidhmada dib u cusboonaysiinta haddii aad ka diiwaan gashan tahay dhexda xafiiskaaga degmada Medicaid. Warqaddan/xidhmadu waxay ku ogaysiin doontaa waxa aad u baahan tahay inaad samayso si aad dib ugu cusboonaysiiso daboolidaada iyo inta wakhtiga yahay aad ku jawaabaysaa. Si toos ah u raac tilmaamaha.

Si aad uga warqabto oo aad u barato wax badan booqo: <https://info.nystateofhealth.ny.gov/COVID-19-Changes>

Caafimaadka Gobolka NY waa New York Goobteeda Suuqa Qorshaha Caafimaadka Rasmiga ah.

Caawimada dib u cusboonaysiinta daboolidaada iyo barashadda wax ku saabsan taariikhdaada dib u cusboonaysiinta:

📞 Naga soo wac:
**1-855-355-5777 ama
TTY: 1-800-662-1220**

AMA

📄 La xidhiidh kaaliyaha adiga kuu dhow: <https://info.nystateofhealth.ny.gov/findassistor>

AMA

📄 La xidhiidh xafiiskaaga maxaliga ah ee Medicaid: https://www.health.ny.gov/health_care/medicaid/ldss.htm

NY State of Health waxay u hoggaansantaa sharciyada xuquuqaha Dadwanaha ee Federaalka iyo sharciyada gobalka, cidnana kuma takoorto arrimo la xariira isirka, midabka, asalka qaranka, caqiidada/diinta, sinjiga, da'da, heerka guurka/qoyska, taariikhda xabsiga lagu qaatay, dembi kuhelida fal dambi, aqoonsiga sinjiga, dookha galmada, sifooyinka u nuglaanshaha hidda sidaha, xaalada militarinimo, heerka gabood falka guriga ee dhibanaha iyo/ama aargoosiga.